Home School Agreement

Slough and Eton Church of England Business and Enterprise College recognises that the partnership between home and school is vital to ensure the success of every student.

Slough iyo Eton Church of England Business and Enterprise College waxa uu aqoonsan yahay in iskaashiga ka dhaxeeya guriga iyo dugsiga uu muhiim u yahay guusha arday kasta.

ARDAYDA: Si loo gaaro natiijooyinka ugu suurtagalka ah, ardayda waxay oggolaadeen inay:

SHAQO ADAG

- si aada u dadaalo marka uu fasalka ku jiro uuna ilaaliyo waqtiyada kama dambaysta ah ee gudbinta hawlaha madaxbannaan.

- Si firfircoon uga qaybqaato wixii dheeraad ah ee dhaqaaqayada dugsiga ay ku jiraan ka qaybgalka naadiyada manhajka ka baxsan iyo casharrada dheeraadka ah.

WANAAGSANOW

- u muujiyaan ixtiraam iyo daryeel dadka kale iyo hantidooda.
- soo sheeg wixii welwel ah ee ku saabsan badbaadada iyo dhaqanka ardayda kale.
- aqbalo oo ixtiraamo dhammaan ardayda iyo shaqaalaha, iyadoon loo eegayn qowmiyadooda, lab iyo dhedig (ay ku jiraan transgender), galmoodka (LGBTQ+), naafanimada, da'da ama diinta.

CUDURDAARLA'AAN:

- si joogta ah u timaado dugsiga aadna ku timaado diiwaangelinta waqtiga loogu talagalay, adiga oo leh hab-dhaqanka saxda ah ee waxbarashada.
- si sax ah u xidho lebiska dugsiga oo soo qaado qalabka saxda ah maalinkasta.
- si fiican ugu dhaqma fasalka gudihiis iyo dibadda ayna fuliyaan dhammaan waxyaabaha uu dugsiga kaa filaayooo ay ku jiraan aadidda safarrada iyo ku soo noqoshada dugsiga sidoo kale safar kasta ama booqasho kasta oo la aadayo.
- inay masuul ka yihiin dhammaan wixii uu leeyahay oo aanay dugsiga soo keenin waxyaabaha qaali ah ama lacag badan.
- kala hadal waalidiinta iyo macalimiinta wixii tabasho ah ee ka jira dugsiga una gudbi waalidiinta dhammaan waraaqaha iyo qoraallada maalinta la soo saaro.
- Inuu u hoggaansamo siyaasadda hab-dhaqanka, cagajuglaynta iyo ilaalinta sharciga ammaanka electrooniga ah (E-Safety).

Magaca Ardayga: …….. Foomka: …….

Saxiixa Ardayga ……

Home School Agreement

WAALIDIINTA: Si loo gaaro natiijooyinka ugu suurtagalka ah ee ardaydeena, waalidiintu waxay oggolaadeen inay:

- taageeraan sharciga dugsiga u degsan oo ay arkaan in ilmahoodu si joogto ah u xaadiro dugsiga, wakhtiga loogu talagalay oo ay si fiican u qalabaysan.

- si firfircoona u danaynayaan dhammaan dhinacyada nolosha dugsiga carruurtooda.
- la xidhiidhaan dugsiga dhammaan macluumaadka khuseeya ee saamayn kara hawlaha ilmahooda ama dabeecadda waxbarashada.

- Ogaysiiya dugsiga haddii, sabab kastaba ha ahaatee, ilmahoodu aanu imaan karin dugsiga.

- Hubiyaan in ilmahoodu raacaan sharciga hab-dhaqanka dugsiga iyo taageerada tallaabada la xidhiidha ee uu dugsigu qaaday.

- ku dhiiri gelin waxbarashada ka baxsan dugsiga, siiyaan tas-hiilaadka ku haboon si ay wax u bartaan, ooyna ku dhiirigeliyaan ilmahooda in ay yeeshaan niyad fiican sax ah oo wax lagu barto.

- ku dhiiri geli ilmahooda inay oggolaadaan oo ixtiraamaan dhammaan ardayda iyo shaqaalaha, iyadoon loo eegayn qowmiyaddooda, lab iyo dhedig (ay ku jiraan transgender), jinsiga (LGBTQ+), naafanimada, da'da ama diinta.

- kana soo qayb galaan habeennada waalidka (Parents' Evening) shirarka taageerada ardayda iyo wakhtiyada kale ee joogitaankooda loo baahan yahay.

- Hubiyaan in dugsigu haysto faahfaahinta xidhiidhka oo sax ah, macluumaadka caafimaadka iyo caqabadaha kale ee ku wajahan barashada ilmahooda.

Saxiixa Waalidka: ……

SLOUGH AND ETON: Si loo gaaro natiijada ugu suurtagalka ah ee ardaydeena, dugsigu wuxuu:

- siin doonaa jawi ammaan ah oo ku dhiirigelinaya dhammaan carruurta si ay wax u bartaan.

- in la siiyo manhaj balaadhan oo dheeli tiran ardayda wax kasta oo awoodooda ah.

- Ku dhiiri geliyo ardayda oo dhan inay qaadaan mas'uuliyadda waxbarashadooda, dareemaan inay ku hanweyn yihiin guulahooda oo ay ku faraxsan yihiin noqoshada ardaynimada ee dugsigan.

- la socodsiinta waalidiinta/daryeelayaasha horumarka carruurtooda iyo arrimaha guud ee dugsiga.

- Dugsigu ku adkaysta in dhammaan ardaydu dhawraan hab-dhaqanka dugsiga iyo sharciga ka-hortagga dulmiga/cagajuglaynta.

- Dugsigu waxa uu siinayaa jawi ardayda oo dhan lagu qaabilo si xushmad leh iyadoon loo eegin isirkooda, lab iyo dhedig (ay ku jiraan transgender-ka), jinsiga (LGBTQ+), naafanimada, da'da ama diinta, iyo ka hortaga dhammaan nacaybka marka ay dhacdo.

- Ku dhaqaaqo cabsi la'aan ama eexasho la'aan arrimaha ku saabsan ilaalinta walaacyada ee Safeguarding, annagoo dhigeyna ilmaha udub dhexaadka go'aannadeena.

- Dejiyo waxbarasho madax-bannaan oo joogto ah iyo fidinta tas-hiilaad ku habboon dugsiga.

- La qiimeeyo hawlaha ardayda lana siiyo bartilmaameed joogto ah iyo hagitaan ku saabsan sida ay u gaari lahaayeen horumar.

Saxiixa Magaca Dugsiga: ……..……..……

TILMAAMAHA BADBAADADA E-SAFETY-GA AH

Marka la eego adeegsiga Nidaamka IT-ga dugsiga ardaydu waa in ay:

- Hubiyaan in magaca-isticmaale/username-kooda IT-ga iyo ereyga sirta ah/passwordkooda yihiin ammaan ayna sugan yihiin - La wadaagi doonnin, iskuna dayi doonin inay isticmaalaan magaca isticmaale iyo ereyga sirta ee qof kale.

- Aanay bixin ama wadaagin macluumaadka shakhsiyeed iyaga ku saabsan ama kuwa kale marka ay online-ka ku jiraan.

- Isla markiiba soo sheego wax kasta oo aan fiicnaynayn ama wax aan habboonayn ama fariimaha ama wax kasta oo dareensiinaya inuu dhibaayo haddii ay internetka ku arkaan.

- Ha u isticmaalin nidaamka dugsiga si gaar ah ama madadaalo (oo ay ku jirto email-ka) illaa ay fasax u haystaan mooyaane.

- Ha u isticmaalin nidaamka iyo aaladaha dugsiga, geemka online-ka ah, khamaarka online-ka ah, wax iibsiga intarneetka, wadaagista faylka, ama baahinta muuqaalka (tusaale, YouTube) ilaa ay fasax u haystaan.

- Aan geli karin, koobigareeynin, ka saarin, ama sinnaba aan u beddelin faylalka ee isticmaalaha kale, iyadoo uusan ogeyn mulkiilaha ama aan ka heysanin fasax.

- Waa inuu leeyahay edeb, yahayna mid mas'uul ah; markeey dadka kale la xidhiidhayaan.
- In uusan qaadin ama qaybinin sawir qof kale, fasax la'aantooda.
- Waxa keliya dugsiga ay ku isticmaalayaan aadaladahooda gaarka ah (sida telefoonada gacanta, qalabka USB iwm.) waa haddii ay haystaan fasax una u isticmaalayaan si waafaqsan xeerarka dugsiga.
- Inaadan isku dayin inaad upload-gareeysid ama soo download-gareeysid ama aad gasho wax kastoo sharci darro ah ama aan habboonayn ama laga yaabo inay waxyeelo ama dhib u keeni karo dadka kale,
- Ha isku dayin inaad isticmaasho barnaamij ama software kasta oo u oggolaanaya inay ka leexiyaan shaandhaynta ama nidaamyada amniga ama waxyeello u geystaan nidaamka dugsiga.
- Isla markiiba u soo sheeg wixii waxyeelo ama cillad ah oo ku lug leh qalabka ama software-ka
- Waa in aadan faraha la gelin, kala gooynin/ka bixin, marna ha isku dayin inaad hagaajiso ama aad waxyeeleeysid qalabka dugsiga.
- Waa inuu isku dayin in uu qalab dugsiyeedka uu ku installl-gareeyo ama ku kaydiso barnaamijyada nooc kasta ha ahaatee, oo aanay isku dayi doonaan in ay beddelaan kombiyuutar settings-ka.
- Waxay isticmaali karaan baraha bulshada iyaga oo haysta ogolaansho iyo waqtiyada la oggol yahay oo kaliya,
- Hubiyaan inay haystaan ogolaansho ay ku isticmaali karaan shaqada asalka ah ee dadka kale shaqadooda.
- Inuu isku dayi doonin in uu soo download-gareeyo shaqada ay ilaalinayso xuquuqda daabacaada (COPY RIGHT) (oo ay ku jiraan muusik iyo muuqaalo).
- Fahmo in shaqada la soo gudbiyay la dhex marin doono "**Turn It In**" sidoo kale shaqada been-abuurka ahna dib loogu soo celin doona iyadoo cunaqabateyn suurtagal ah ay la socoto.
- Ha u isticmaalin Sirdoonka Artificial (AI) dhamaystirka shaqada looga baahan yahay. Ardeyga arrintan sameeynaya waxaa laga yaabaa in la ganaaxo ama la cunaqabateeyo.
- Fahmo in nidaamka IT-ga la kormeero, jebinta sharcigan waa la baari doonaa oo lagana qaadi doonaa tallaabo ku haboon.